



Casriyeynta Dugsiga Sare ee Jefferson Qorshaynta Sare



Xafiiska Casriyeynta Dugsiga ee PPS ayaa dhawaan bilaawi doona nidaamka qorshaynta sare ee casriyeynta Kuliyada Dhexe ee Dugsiga Sare ee Jefferson ee Taariikhiga ah ee Daraasaadka Sare. Qorshaynta Master-ka waa tallaabada ugu horreysa ee go'aaminta qaab-dhismeedka dugsi cusub. PPS waxay ra'yiga ka raadinaysaa bulshada Jefferson ee ku saabsan naqshadaynta. Waxayna raadinaysaa iskaa wax u qabsoyal si ay ugu biiraan Guddiga Qorshaynta Sare ee Jefferson. Si aad u codsato, iimayl u dir JHSMOD@pps.net ama booqo <https://www.pps.net/JeffersonBond> wixii macluumaad dheeraad ah.

Dhammaan codadkiina waa la soo dhawaynayaa

PPS waxay diyaarinaysaa ka-qaybgal oo adag. Waxaan rabnaa inaan ka maqalno codadka kala duwan ee bulshada Jefferson. Waxaan si buuxda u aqoonsanahay taariikhda sinnaan la'aanta Portland, gaar ahaan laxidhiidha dadaallada horumarineed ee ka jira xaafadaha taariikhiga ah ee madow sidaa darteed PPS waxaa ka go'an inay hubiso in dhammaan codadka la maqlo maadaama mashruucan muhiimka ah uu horay u socdo.



Faahfaahinta Mashruuca Casriyeynta

Dhammaadka 2019, marki la ka gudbay shirir dadwayne oo xiriir ah oo socday muddo afar bilood ah, **Qorshaha Guud ee Fikradda Dugsiga Sare ee Jefferson** waa la dhammeeyay iyada oo qayb ka ah dadaalka qorshaynta ee Bondka 2020. Qorshahan fikradeed waxa loo isticmaali doonaa sidii meesha laga bilaawayo Qorshaha Guud ee Casriyeynta ee Jefferson, laakiin Guddiga Qorshaynta Master-ka ee cusub (MPC) laguma xaddidi doono qorshayaashaas.

Si aad u heesho macluumaad dheeraad ah iyo si aad wax uga ogaato fursadaha hawlgelinta ee mustaqbalka booqo pps.net/JeffersonBond.
Ku soo biir liiska boostada mashruuca Jefferson halkan JHSMoD@pps.net.




To read it in your language use this QR code.
Para leerlo en su idioma, use este código QR.
Để đọc bằng ngôn ngữ của quý vị, hãy sử dụng mã QR này.
Чтобы прочесть сообщение на другом языке,
просканируйте этот QR-код.
Si aad ugu akhrido luqadaada isticmaal code-kan QR.
请使用此QR码用您的母语阅读本文。



Ku saabsan Jefferson

Dugsiga Sare ee Jefferson ee taariikhiga ah, oo ku yaal xaafadda North Portland Albina, ayaa muddo dheer u shaqaynaysay sidii mid ka mid ah bulshada Madaw ee Portland. Goobta 14-acre ah waxaa ku jira dhismihii asalka ahaa ee 1909, oo lagu daray waxyaabo dambe, iyo meel socod ah iyo garoon. Jefferson waa dugsi sare oo bixiya koorsooyinka diyaarinta xirfadaha asaasiga ah iyo diyaarinta kulliyadda iyo sidoo kale ciyaaraha iyo nashaadaadka. Ardaydu waxay koorsooyin ku qaataan

Portland Community College, lacag la'aan taas oo qayb ka ah Khibrada Kulliyada Dhexe. Jefferson waxa ay caan ku tahay diiradda ay saarto waxbarashada sayniska caafimaadka, iyo Barnaamijyada Farshaxanka Muuqaalka oo ay ku jiraan Ciyaartoyga caanka ah ee Jefferson. Dugsigu waxa uu leeyahay liis adag oo wada-hawlgalayaasha bulshada ah, oo ay ku jiraan Laatiin Network iyo Self Enhancement Inc (SEI) kuwaas oo ardayda siiya adeegyo latalin iyo taageero bulsho.



Jadwalka Casriyeynta ee Jefferson

Guddiga Qorshaynta Master-ka ee Jefferson ayaa la samayn doonaa usbuucyalka soo socda si ay shaqada u bilaawaan guga 2022 oo ay socdaan dhawr bilood. Dhowr simaaro naqshadeynta dadweynaha ayaa la qaban doonaa si ay uu helayn bulshada fursad ay ku miisaamaan habka naqshadaynta marka ay horumarayso. Marka la dhameeyo qorshaha masterka, mashruuca wuxuu u guurayaa naqshadeynta oo ay ku xigto dhismo la bilaawaya 2024. Jefferson oo la casriyeeyay ayaa la qorsheeyay in la furo bilawga sanad dugsiyeedka 2026-27.

AAN ISLA DHISANNO MUSTAQBALKAYNA

<https://www.pps.net/JeffersonBond> • JHSMoD@pps.net • 503-916-2222
f www.facebook.com/pps.homepage/ @PPSConnect

Horumarinta Dhismaha
Dugsiyada Dadweynaha Portland



Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waa shaqo-bixiye wax-qabad leh iyo fursad loo siman yahay